



# Dhibid (mobbing) ka dhacda xannaanada carruurta

SOMALI

GUDDIGA WAALIDDIINTA EE  
XANNAANOYINKA CARRUURAH

FORELDREUTVALGET  
FOR BARNEHAGER





**"Carruurta waa waxa ugu  
qaalisan ee ay waalidku haystaan,  
in ay carruurta ka helaan nolol-  
maalmoorkoodana waa mid  
aad muhiim ugu ah kalsoonida  
waaidka."**

**Ma dhacdaa in xannaanada carruurta ilmaha lagu dhibo?**

Haa, way dhacdaa in xannaanada carruurta ilmaha lagu dhibo. Qaar badan oo ka mid ah shaqaalaha xannaanooyinka carruuraha ayay ku adag tahay in ay qeexaan habdhaqanka xannaanooyinka ee ay dhibidda u arkaan. Mid ka mid ah sababaha arrintan ayaa la xiriirta "leexleexasho" laga leexanayo in la arko saamaynta uu habdhaqanka xun ee ilmaha yaryari ku yeelan karo dadka kale.

Inkasta oo aysan dhibidda ahayn dhib weyn oo wax walba ka weyn oo ka jira xannaanada carruurta, ayuu haddana dhib khatar ah ku yahay kuwa uu khuseeyo. Dareenka ay ilmuhu dareemaan in loo geysto qoqobid, ereyo meel-uga-dhac ah iyo fa-lal, waa isku xanuun ama aan dhibid ugu yeerno ama yaynaan ugu yeerin.

FUB waxay qayb ka yihiin maanafeestada looga soo horjeedo dhibidda (Manifest Mot Mobbing), waxayna doonayaan in laga hadlo oo miiska la soo saaro dhibidda ka jirta xannaanada carruurta.

**Sidee ayay u eg tahay dhibidda ay ilmo yaryari is dhibayaan?**

Baaritaannada ku saabsan waxa ay ilmuhu xannaanada carruurta kala kulmaan ayaa tusaya in tobankii ilmoodba uu mid dhib kala kulmo xannaanada carruurta. Calaamadaha lagu garto dhibidda noocan ah waxaa ka mid ah:

- gacanqaadid, riixid iyo timaha jiidid
- caayid, ku qoslid, wax xun ugu yeerid
- in ay wax iska jebebiyaan oo wax iska qariyaan
- qoqobid

**"Wax lala yaabo ma aha in ay carruurta kale Nina caayaan, way oohin dhow dahay!"**

Shaqaalaha xannaanada carruurta waxay wada hadal la yeelan karaan carruurta, si ay wax uga ogaadaan sida ay meesha uga helaan iyo sida uu yahay xiriikooda marka ay koox u wada joogaan.



### **Maxay xannaanada carruurta iyo waalidku qaban karaan?**

Dadka waaweyni waa in ay arrinta si toos ah uga hadlaan ayna si xushmad leh mararka ay dhibidi dhacdo u sheegaan in aan taas la aqbali karin. Waxaa muhiim ah in la xusuusto in marka ay dhibidi jirto in aysan carruurta isku awood ahayn haddii carruurta la wareystana, waxaa uun hadalkiisa la maqlayaa "midka ugu xoog badan" oo keliya.

Marka carruurta iyaga oo keliya laysaga dhex baxo iyaga oo jooga xannaanada carruurta, waxaa fudud in midka ugu xoog badan ay tiisu socoto.

Waxaa dadka waaweyn laga rabaa:

- in ay carruurta la joogaan si dhibidda loo ogaado
- ay joogaan meel u dhow oo wax laga maqli karo lagana arki karo
- ay ahaadaan kuwo firfircoon, u dhega nugul oo xiisaynaya
- ahaadaan kuwo daneeya

"Qofka weyn ee awood u leh isaga oo soo jiidanaya ilmaha in uu si cad xad ugu sameeyo, wuxuu ka hor tagayaa dhibidda iyo habdhaqannada kale ee aan bulshada u fiicnayn. Qofka noocan ah waxaa loo arkayaa mid awood leh, oo la maqlo waana qofka ay carruurta iyo dhallinyaradu u baahan yihiin."

Waa in si nidaamsan looga shaqeeyaa sidii looga dhalin lahaa ixtiraam iyo isu-dulqaadasho carruurta dhexdooda ah marka ay joogaan xannaanada. In xannaanada carruurta looga shaqeeyo hab dadka isu soo dhoweeyaa waxay si fiican ka-hortag ugu samaynaysaa is-dhibidda iyo kalasoooca carruurta dhexdooda wakhtiga uu ilmuhu xannaanada ku jiro iyo musqabalkaba. Saaxiibtinnimada carruurta dhex marta ayaa iyana ah shardi muhiim ah oo looga hor tago dhibidda. Waalidka iyo shaqaalaha xannaanada carruurta hawl aad iyo aad muhiim u ah ayaa u taalla taas oo ah in ay suuragelinyaan in carruurta saaxiibtobto.

"Waa hadaf shaqo oo muhiim ah in ay ilmuhu saaxiibbo ku noqdaan xannaanada carruurta. Saaxiibtinnimadu waa waxa ugu wanaagsan ee looga hor tago dhibidda."



### **Wadashaqaynta guriga iyo xannaanada carruurta:**

Aad iyo aad ayay muhiim u tahay in shaqaalaha xannaanadu isla markiiba waalidka la socodsiiyaan marka ay ka shakiyaan in dhibidi jirto. Waxaa si sidaa si la mid ah muhiim u ah in ay waalidku xannaanada carruurta wargeliyaan marka ay ogaadaan in ay dhibidi ka jirto carruurta dhexdooda. Waxaa aad muhiim u ah in carruurta, waalidka iyo shaqaaluhu ay ka wada hadlaan sidii dhibidda loo joojin lahaa, oo ay dadka waaweyni sameeyaan qorshe looga hor tegayo arrintan.

In ay la socdaan sida ay ilmahoodu meesha uga helaan iyo sida uu xaalkoodu halkaas ku yahay ka sokow, waxaa iyadana aad iyo aad micno weyn u samaysa marka ay waalidku daneeyaan ilmaha kale oo ay wax ka siiyaan wakhti-maalmoodkooda. Sida iyagoo salaama, la yar hadla ama guryahooda ku casuuma.



Guddiga waalidka ee  
xannaanooyinka carruurta  
[www.fubhg.no](http://www.fubhg.no)  
[post@fubhg.no](mailto:post@fubhg.no)

Waxaa soo saaray Guddiga waalidka ee xannaanooyinka carruurta (FUB) - 2012